Oregon Health Authority
QAYBTA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Hagida Dib ufurida ee Wajiga Koowaad

Maqaayadaha, Biibitooyinka, Meelaha qamriga lagu sameeyo, Baararka qamriga, Meesha waynta lagu sameeyo, Qolalka Dhadhaminta iyo Meelaha isbiriidka lagu sameeyo *(La cusbooneysiiyay 8-5-2020)*

Hoos waxaa ku yaalo jawaabaha su'aalaha inta badan la is weydiiyo ee ku saabsan Hagida Dib u furida Wajiga Labaad ee Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA): Hagida Gaarka ah ee Maqaayadaha, Biibitooyinka, Meesha waynta lagu sameeyo, Qolalka Dhadhaminta iyo Meelaha isbiriidka lagu sameeyo (hagida Wajiga Labaad ee Maqaayadaha iyo Baararka). Hagida iyo FAQ-yadaan waxay quseeyaan kaliya ganacsiyadaas ka howlgalayo gobolka loo ansixiyay Dib u furida Wajiga Labaad. OHA waxay u bixisaa FAQ-yadaan si ay uga caawiso inay bulshada fahamto hagida, inay ka jawaabaan su'aalaha daneeyeyaasha, iyo inay xaqiijiyaan sida hagida u quseyn karto dhacdooyinka gaarka ah. FAQ-yadaan ayaa si isdabajoog ah loo cusbooneysiiyaa. FAQ-yadaan looguma talagelin inay galaan booska hagida, laakin waxaa loogu talagalay inay fasiraan, kabaan, oo gacan ka geystaan buuxinta faahfaahinta hagida.

Hawlwadeenada

S1: Miyay maqaayadaha loo ogolyahay inay qabtaan dhacdooyinka sida xafladaha qalinjabinta iyo nikaaxyada? Hagidee ayaa ah in loo raaco dhacdo noocaas ah?

J1: Haa, haddii ay u shaqeyso sida howlwadeen goob ama dhacdo ayna raacayso Hagida Dib ufurida Wajiga Labaad ee Howlwadeenada Goobaha iyo Dhacdada. Howlawadeenada maqaayada ma yeelan karaan adeega maqaayada oo joogto ah oo isku waqtiga ah sida dhacdada. Howlawadeenada maqaayada waa inay wada nadiifiyaan dhammaan aagaga goobta ka hor dib u furida kadib xiritaanka la kordhiyay iyo inta lagu jiro nadiifinta aagaga oo dhan ee u dhaxeyso dhacdooyinka.

S2: Miyaa maqaayadaha uga baahanyihiin macaamiisha inay xirtaan waji daboolada?

J2: Makhaayadaha oo dhan waa inay u hoggaansamaan Hagida Gobolka oo dhan ee Maaskarada, Gashaanta Wajiga, Waji Daboolka. Macaamiisha iyo booqdeyaasha waa inay xirtaan maaskaro, waji dabool ama gashaanta wejiga marka ay joogaan makhaayad, marka laga reebo marka ay wax cunayaan/cabayaan ama marka aysan joogin goob dadweynaha wajahayaan halkaasoo masaafo ah (6) fuud ama ka badan la isku jiri karo.

S3: Miyaa shaqaalaha maqaayadaha oo dhan looga baahanyahay inay xirtaan waji daboolka inta lagu jiro Wajiga Labaad?

J3: Haa. Dhammaan maqaayadaha, biibitooyinka, meelaha qamriga lagu sameeyo, baararka qamriga, meesha waynta lagu sameeyo, qolalka dhadhaminta iyo meelaha isbiriidka lagu sameeyo waa inay weydiiyaan dhammaan dhaqaalaha inay xirtaan maaskaro, waji daboolka ama gaashaanka wajiga sida waafaqsan hagida OHA. Waji daboolada looma baahno markii aad wax cuneysid/cabeysid ama markii aad ku jirtid goobaha wajahayo bulshada halkaasi oo la kala fogaan karo masaafo ah lix (6) fuud ama ka badan.

S4: Waa maxay hagida madadaalada dadka waaweyn ee Wajiga Labaad?

J4: Howlwadeenada baararka madadaalada dadka waaweyn waa inay u hogaansamaan Hagida Guud ee Shaqaalaha, iyo Hagida Gobolka oo dhan ee Maaskarada, Gashaanta Wejiga iyo Weji Daboolka, iyadoo ku xiran gobolka baarka uu ku yaalo. Haddii kooxyada madadaalada dadka waaweyn bixiyaan ama bixinayaan cunto ama qamri, waa inay u hogaansamaan hagida Wajiga Labaad ee Maqaayada iyo Baarka. Madadaaliyayaasha dadka waaweyn iyo shaqaalaha kale, oo ay ku jiraan shaqaalaha, tabaruceyaasha iyo qandaraasleyda, waa inay joogteeyaan masaafo ah ugu yaraan lix (6) fuud oo kala fogaansho jireed ah oo u dhaxayso iyaga iyo macaamiisha marwalba.

S5: Shaqaalaha baarka ma inay xirtaanbaa gacmo gashiyo markii ay siinayaan cabitaano martida?

J5: Maya. Si kastaba ha noqotee, shaqaalaha baarka waa inay yareeyaan ku taabashada gacanta-qaawan cuntada oo ay adeegsadaan maacuunta. Tusaale ahaan, u isticmaal maacuunta wixii ah qurxiyayaasha sida liimada ama jeeriska.

S6: Miyay furantahay cuntada iskaa u gurashada inta lagu jiro Wajiga Labaad?

J6: Maya. Howlgalada macmiilka iskaa-u adeegsiga, oo ay ku jiraan cuntada iskaa u gurashada, qeybaha ansalaatada, mashiinada soodhada iyo saldhigyada dib u buuxsiga dhalada weli way xiran yihiin inta lagu jiro Wajiga Labaad. Cuntada waxaa loogu adeegi karaa howlgalka nooca-iskaa u gurashada haddii ay bixinayaan kaliya shaqaalaha maqaayada oo tallaabooyinka kala fogaanshaha jireed laga joogteeynayo inta u dhaxeyso macaamiisha iyo shaqaalaha.

S7: Miyay saldhigyada gacmo dhaqashada banaanka u baahanyihiin inay lahaadaan tuubo kuleel ah ama biyaha qabow ayaa ku fillan?

J7: Saldhigyada gacmo dhaqashada loogama baahno inay lahaadaan biyo kuleel laakin waa inay lahaadaan saabuun, biyo iyo shukumaan fur-oo-tuur ah.

S8: Miyaa laga ogolyahay qalabka xulashada muusiga Wajiga Labaad?

J8: Haa. Howlwadeenada qalabka xulashada muusiga waa inay raacaan hagida loogu tallogalay Xarumaha Madadaalada Gudaha iyo Banaanka iyo, haddii ay quseyso, hagida Wajiga Labaad ee Maqaayadaha iyo Biibitooyinka. Howlwadeenada waa inay jeermisdilaan oo nadiifiyaan dhammaan qalabka

muusiga, oo ay ku jiraan makarafoonada, inta u dhaxeeyso isticmaalada kooxyo kala duwan. Hawlwadeenada qalabka muusiga waa inay u hoggaansamaan Hagida Gobolka oo dhan ee Maaskarada, Gashaanta Wejiga iyo Weji Daboolka.

S9: Waa maxay sharuudaha lagu nadiifinayo buulka iyo ulaha buulka ee Wajiga Labaad?

J9: Howlwadeenada buulka iyo balooniyada buulka waa inay raacaan hagida loogu tallogalay Xarumaha Madadaalada Gudaha iyo Banaanka iyo, haddii ay quseyso, hagida Wajiga Labaad ee Maqaayadaha iyo Biibitooyinka. Howlwadeenada waa inay jeermisdilaan oo ay nadiifiyaan dhammaan qalabka la wadaago, oo ay ku jiraan ulaha, jeestooyinka iyo balooniyada buulka, inta u dhaxeyso isticmaalka kooxyada kala duwan.

S10: Ganacsigeyga wuxuu leeyahay miisaska teeniska, iyo sidoo kale maqaayad iyo baar buuxo. Miyaan furi karaa inta lagu jiro Wajiga Koowaad ama Wajiga Labaad?

J10: Inta lagu jiro Wajiga Koowaad, maqaayada iyo baarka waa la furi karaa haddii ay u shaqeynayaan si waafaqsan hagida Wajiga Koowaad ee Maqaayadaha iyo Biibitooyinka haddii aad xirtid miisaska teeniska. Wajiga Labaad, waad furi kartaa aagaga miiska teeniska haddii ay u shaqeynayaan si waafaqsan hagida loogu tallogalay Xarumaha Madadaalada Gudaha iyo Banaanka iyo hagida Ciyaaraha Madadaalada.

S11: Haddii ganacsi tafaariiq uu goob lagu cunteeyo ka furo baakinka oo ay leedahay fadhi banaanka ah, miyay hagida OHA ee maqaayadaha quseysaa?

J11: Haa. Goobta lagu cunteeyo waxaa loo tixgeliyaa maqaayad ahaan oo waa inay raacdaa hagida Maqaayadaha iyo Baarka.

S12: Waa maxay hagida loogu tallogalay falaar toogashada iyo miiska ciyaaraha?

J12: Falaar toogashada iyo miiska ciyaaraha waa laga ogolyahay Wajiga Labaad. Howlwadeenada ciyaarahan waa inay raacaan hagida loogu talloglay Xarumaha Madadaalada Gudaha iyo Banaanka iyo, haddii ay quseyso, hagida Maqaayadaha iyo Biibitooyinka. Howlwadeenada waa inay jeermisdilaan oo nadiifiyaan dhammaan qalabka la wadaagay sida diskiyada falaar toogashada iyo miiska ciyaaraha, inta u dhaxeyso isticmaalada kooyada kala duwan.

S13: Maxaan sameeyaa haddii macmiil muujinayo aastaamaha COVID-19 soo galo maqaayadeyda? Ma weydiin karaa in qofka baxo?

J13: Maqaayadaha iyo biibitooyinka waxay dhajin karaan aastaamaha qorayo aastaamaha COVID-19, weydiinayo in shaqaalaha iyo macaamiisha qabo aastaamaha joogaan guriga, oona taxayo cida lala xiriirayo haddii ay caawin u baahanyihiin. Maqaayadaha iyo biibitooyinka waa inay kala tashtaan la taliyaha sharciga wax ku saabsan xeerarka lagu diidayo adeega. Maqaayadaha ma diidi karto adeega iyadoo ku saleynayso jinsiyada qofka, midibka, jinsiga, dooqa galmada, aqoonsiga jinsiga, diinta, kartida, ama asalka qarni. COVID-19 wuxuu ku dhici karaa qof walba oo baylah u noqdo, qof walba ayaana faafin kara COVID-19.

S14: Miyaa meelaha waynta lagu sameeyo iyo qolalka dhadhaminta looga baan yahay inay uruuriyaan macluumaadka macmiilka iyadoo ujeedooyinka yihiin raadraaca u dhawaanshaha haddii ay dhacdo in qof laga helo cudurka?

J14: Maya. Maqaayadaha, biibitooyinka, meelaha qamriga lagu sameeyo, baararka qamriga, meesha waynta lagu sameeyo, qolalka dhadhaminta iyo meelaha isbiriidka lagu sameeyo loogama baahno inay joogteeyaan macluumaadka xiriirka macmiilka si loo sameeyo raadraaca u dhawaanshaha.

S15: Miyaa mashiinka biyaha laga cabo la ogolyahay, ama miyaa midaas loo tixgeliyaa inay tahay howlgalada iskaa-u adeegsiga lana mamnuucay?

J15: Saldhiga mashiinka biyaha laga cabo waxaa loo txigeliyaa iskaa-u adeegsiga oo waa mamnuuc.

S16: Haddii aan ku dhajino mashiinka calaamad dhahayso “hal isticmaal kaliya” ama “fadlan weydii galaas cusub si aad u buuxisid cabitaankaaga,” miyaa taasi la ogolaan karaa?

J16: Maya. Howlgalada macmiilka iskaa-u adeegsiga, oo ay ku jiraan cuntada iskaa u gurashada, qeybaha ansalaatada, mashiinada soodhada iyo saldhigyada dib u buuxsiga dhalada weli way xiran yihiin inta lagu jiro Wajiga Labaad.

S17: Muxuu badrooniga u baahanyahay inuu sameeyo haddii shaqaalaha maqaayada muujiyo aastaamaha COVID-19?

J17: Badrooniga waa inuu raacaa hagida Guud ee loogu tallogalay Badrooniyada. Badrooniga waa inuu u tilmaamaa shaqaalaaha jiran inay guriga joogaan ama guriga aadaan haddii ay jiradaan iyaga oo shaqada joogo. Shaqaalaha waa inuusan shaqada imaan haddii ay qabaan:

- Qandho (iyada oo la isticmaalayo cabiraha afka).
- Aastaamaha sida qufaca, mataga, ama shubanka.

Haddii shaqaalaha imaado shaqada isaga oo muujinayo aastaamo, ama haddii ay yeeshaan aastaamao iyaga oo shaqada joogo, badrooniyada waa inay ka gooniyeeyaan shaqaalaha jiran shaqaalaha kale. Shaqaalaha jiran waa in guriga loo diraa islamarkiiba ama uu raadsadaa daryeel caafimaad oo ku haboon haddii ay muhiim tahay.

Badrooniyada waa inay si joogta ah ugu sheegaan shaqaalaha inay guriga joogaan markii ay jiranyihiin, ayna xaqiijiyaan in siyaasadaha goobta shaqada ogolaanayaan fasaxa jirada si markaas dadka u sameeyaan wax saxda ah iyaga oo cudurka ka illaalinayo shaqaalaha ay isla shaqeeyaan; daboolayo qufacooda iyo hindhisada; oona si joogta ah u dhaqayo gacmahooda.

Haddii shaqaale ku dhaco caabuqa COVID-19, badrooniyada waa inay:

- La shaqeeyaan caafimaadka dadweynaha si loo go’aamiyo shaqaalaha u dhawaaday, muddada dheer la qaatay iyagoo isku dhow shaqaalaha jiran ee gelin karo halista soo gaarista COVID-19

- U joogteeyaan qarsoodiga warbixinta caafimaadka shaqaalaha si waafaqsan sharciyada quseeyo.

S18: Miyuu heerkulka shaqaalaha u baahanyahay in la qaado ka hor isbadel walba?

J18: Heerkulka waxaa loo baahanyahay in la qaado ka hor isbadel walba, laakin badrooniyada waxay rabi karaan inay tixgeliyaan codsashada baaritaanada caafimaadka (tusaale ahaan, baaritaanka aastaanta heerkulka iyo neefsashada) ama aastaanta is-wargelinta shaqaalaha, haddii shaqada la xiriirto ayna la jaanqaadayso muhiimada ganacsiga.

S19: Biibitooyinka May waxay bixin karaan ama martigelin karaan dhacdooyinka Texas Hold'em, Bingo, ama Bunco inta lagu jiro Wajiga Koowaad ama Wajiga labaad?

J19: Howlahaas lagama ogolaan Wajiga Koowaad. Qolalka kaararka ee aan qabiilka aheyn ayaa qaban kara inta lagu jiro Wajiga Labaad.

S20: Sidee ayay maqaayadaha iyo biibitooyinka u nadiifiyaan miisaska kadib markii macmiil ka tago?

J20: Nadiifinta sagxadaha ay cuntada taabato ee jikada iyo "gadaasha guriga" waa in loo sameeyaa si waafaqsan Sharciyada Nadaafada OAR 333-150-0000. Wixii ah aagagga "guriga hortiisa", Hay'adda Ilaalinta Deegaanka ee Maraykanka waxay leedahay waxsoosaarada qaar oo ay hore u ansixisey kuwaasi oo ku fiican dilista fayrasyada la midka ah COVID-19. Dhammaan jeermisdilayaasha buuxiya heerkan waxa laga heli karaa halkan. Jeermisdilayaasha oo dhami ma aha qaar loogu talogalay meelaha cuntadu taabato waana in biyo lagu dhaqo oo la nadiifiyo iyadoo la raacayo tilmaamaha. Fiiri qeybta "jeermisdilka" ee qoraalka badeecada aad dooratay oo isticmaal waqtiga daawo marinta ee ugu badan iyo qiimaha barxida diirada la saaray (tirada jeermisdilayaasha lagu qasayo biyaha) ee qeybtaan.

S21: Miyaa macaamiisha wax iibsado iyagoo gaariga ku jira looga baahan yahay inay xirtaan daboolada wajiga?

J21: Haa, sida uu dhigayo Hagida Gobolka oo dhan ee Maasgarada, Gaashaanka Wejiga, Daboolada Wejiga, haddii macaamiisha aysan awoodin inay ilaaliyaan lix (6) fuud oo kala fogaansho jireed ah oo u dhaxaysa gaarigooda iyo daaqadda iibsiga markaa waxaa looga baahan yahay inay xirtaan daboolka wejiga, maaskaro ama gaashaanka wejiga.

S22: Bandoowga 10-ka habaynimo miyuu khuseeyaa goobta cashada gudaheeda keliya ama sidoo kale wax iibsashada iyadoo lagu jira baabuurka?

J22: Bandoowga 10-ka habaynimo wuxuu quseeyaa goobta gudaha iyo banaanka cuntada - ee ma quseeyo wax ku iibsashada gaariga gudihiisa.

Kala Fogaanshaha Dadka iyo Tirada Dadka Jooga Goobta

S1: Miyay aqbilaada Hagida Wajiga Labaad ee loogu tallogalay alaabaha daah gelinta (dhar ka sameysan)/aan-la biyo ka gudbi karin ay quseeysaa kaliya in kala gooniyeeyo xeryaha ama waxaa lagu rakibi karaa inta u dhaxeyso miisaska ama fadhiyada miiska wax iibinta si ay ugu ogolaato kooxyada ama shaqsiyaadka inay isku jiraan in ka yar lix (6) fuud?

J1: Hagida gelinta daaha waxay quseysaa dhammaan noocyada fadhiga iyo dhismooyinka lootada fiidiyaha. Carqalada waa inay ahaataa mid aan biyo gudbeyn, fudud in la nadiifiyo, oo ugu yaraan hal (1) fuud ka dheer heerka madaxa ee macaamiisha fadhido oona ballarkeedu yahay ugu yaraan sadex (3) fuud ama ugu yaraan ballarka fadhiga haddii ka dheeryahay sadex (3) fuud. Fadlan la soco in carqaladaha jireed aynan beddelayn shuruudaha xirashada maaskarada, gaashaanka wejiga, ama daboolada wejiga sida waafaqsan Hagida Gobolka oo dhan ee Maaskarada, Gaashaanka Wejiga, Daboolada Wejiga.

S2: Hagida Wajiga Labaad ee Maqaayadaha iyo Biibitooyinka waxay mamnuucdaa fadhiga biibitada illaa lix (6) fuud la joogteeyo, laakin waxay ogoshahay daaha badelkii lixda fuud– ma cadeyn kartaa?

J2: Howlwadeenada waxay leeyihiin labo dooqyo oo kala duwan oo ogolaanayo fadhiga biibitada ee Wajiga Labaad. Fadhiga biibitada waa la ogolyahay haddii miiska wajaho daaqad ama darbi oo ugu yaraan la joogteeyo masaafo ah lix (6) fuud oo u dhaxeyso kooxyada iyo/ama shaqaalaha biibitada sida waafaqsan hagida Wajiga Labaad. Taa badelkeeda, fadhiga biibitada waa la ogolaaday haddii daaha (dhar ka sameysan) ama carqalad kaloo jireed oo aan biyo gudbeyn loogu dhajiyo si waafaqsan hagida Wajiga Labaad. Shaqaalaha waa in looga gooniyeeyaa macaamiisha carqalada marka laga reebo dhaxgalada kooban (tusaale ahaan, geynta cuntada). Haddii ganacsigu uusan u hogaansami karin labada xulasho midkood, fadhiga baarka waa mamnuuc. Carqaladaha jireed ma beddelayn shuruudaha xirashada maaskarada, gaashaanka wejiga, ama daboolada wejiga sida waafaqsan Hagida Gobolka oo dhan ee Maaskarada, Gaashaanka Wejiga, Daboolada.

S3: Imisa qof ayaa laga ogolyahay maqaayada?

J3: Sida waafaqsan Wajiga Labaad, maqaayada/goobta waxaa joogi kara illaa 100 qof oo gudaha kujira ama 250 qof oo banaanka joogo, mana aha inay tirada dadka dhaafto 250 oo joogo gudaha iyo banaanka; ama tirada dadka, oo ay ku jiraan shaqaalaha, sida ku saleysan go'aaminta mugga goobta (cabirka goobta oo fuud lagu cabiray/mugga goobta), hadba midii yar, sida lagu qeexay hagida Usu imaanshaha OHA.

S4: Miyaan miis cunto balaaran ama miis caadi ah ku fariisan karnaa wax ka badan hal koox?

J4: Maya. Ku xadey kooxyada 10 qof ama ka yar. Marka la joogo goobaha fadhiga ee la wadaago, ha iskugu geyn kooxaha/martiyada aanan dooran inay isugu

yimaadaan goob fadhi wadaag. Dadka wada socda ee wada fadhiya hal miis ma aha inay kala fogaadaan lix (6) fuud.

S5: Waa maxay "koox?"

J5: Kooxda waxaa loola jeedaa koox dad ah oo usu imaado ama doorto inuu isugu yimaadaan goobta.

S6: Waa maxay hagida fadhiga wadada lugeynta? Miyaa midaan laga ogolyahay hadii lix (6) fuud u dhaxeyso kooxyada? Ka waran barandooyinka maqaayada ee taabto wadada lugeynta - miyaa miisaska la dhigi karaa barandada xittaa haddii aysan lix (6) fuud ka fogeyn geeska wadada lugeynta?

J6: Macaamiisha waa inay u suurtogashaa inay joogteeyaan masaafo ah lix (6) fuud oo u dhaxayso iyaga iyo dadka kale ee aan ka mid aheyn kooxdooda. Taasi waxaa ku jiro shaqsiyaadka laga yaabo inay ku lugeynayaan wadada ama wadada lugeynta. Haddii meheraddu aysan awoodin inay joogteyso in ugu yaraan masaafo ah lix (6) fuud u dhaxeysa dadka, marka laga reebo isdhexgalyada gaagaaban (tusaale ahaan, marka cuntada la geeynayo miiska), waxay u shaqeyn kartaa oo kaliya sida adeeg geeyo cuntada ama laga qaato cuntada. Shaqaalaha iyo macaamiisha waa inay raacaan Hagida Gobolka oo dhan ee Maaskarada, Gaashanka Wajiga, Daboolada Wajiga. Tani waxay khusaysaa goobaha leh fadhiga gudaha iyo kuwa leh fadhiga banaanka labadaba.

Helitaanka dukumiintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsoha.state.or.us.